

Mashruuca Niitty 2018 illaa 2020

<https://projects.tuni.fi/niitty/>
www.facebook.com/niittyhanke/

Maamulaha Mashruuca Irmeli Nieminen.

Iimeeyl: irmeli.nieminen@tuni.fi

Takhasuse Anna Aikasalo. Iimeeyl: anna.aikasalo@tuni.fi

Takhasuse Jasmin Kaljadin. Iimeeyl: jasmin.kaljadin@tampere.fi

Ilaha iyo macluumaad dheeraad ah:

Machadka Caafimaadka iyo Daryeelka ee Finnish (THL). 2017. Terveystarkastukset lasten-
neuvolassa ja kouluterveydenhuollossa. Menetelmäkäsikirja. Opas 14.

Ururka Mannerheim ee Daryeelka Carruurta. Vanhempainnetti. Waxaa laga helayaa:
www.mll.fi/vanhemmille



Niitty – Horumarinta Qaab Tababar Qoys ee
Ku saleysan Dadka isku Heerka ah oo loogu
talagalay Soo-galootiga

DHEX GALIDDA BULSHADA EE XILLIGA HORE

Varhainen vuorovaikutus



EEGID, ERAY TAABASHO

- Wax kastoo aad canugaaga la sameyso waxay ka mid yihiin dhex galidda bulshada ee xilliga hore.
- Dhex galidda bulshada ee xilliga hore waxay canuga ka caawineysaa inuu barto sida uu u eegyahay ama u egtahay. Canuga sidoo kale wuxuu baranayaa sida ay dadka kale u egihiin.
- Waalidiinta wey saameyn karaan koritaanka ilmaha iyo horumarkiisa.
- Dhex galidda bulshada ee xilliga hore waa wakhtiyo yar oo udhaxeeya canuga iyo waaildka.




Xaaladda loolanka ama dhacdooyinka cabsida leh ee nolosha waalidka ayaa laga yaabaa iney ka dhigto dhex galidda bulshada ee xilliga hore ee canuga mid aad u adag.

Ka hadal wax arintaas ku saabsan markaad ku sugantahay xarunta caafimaadka ilmaha! Caawimaadda waa diyaar!

WAKHTIYADA MAALIN KASTA AH EE LA WADAAGO

La hadal canuga. Usheeg waxa aad sameyneyso.

Fiiri waxa uu canuga sameynaayo ugana jawaab farriimihiisa ama farriimaheeda.



JOOGITAANKA WAALIDKA

- Muhiim ayey utahay canuga inuu wakhti la qaato waalidka.
- Canuga wuxuu ogaanayaa marka uu waalidka faraxsanyahay kuna raaxeysanayo in si wada jir ah wax u sameeyaan.

Canuga iyo waalidkaba muhiim ayey utahay iney is bartaan oo isla sameeyaan waxa ay labadooduba jecelyihiin.



DHEX GALIDDA BULSHADA

Canugaaga foolka fool u hor imow. Canuga wuxuu raadiyaa wajiyaal uu garanayo.

Canuga indhaha ka fiiri. Canuga muhiim ayey utahay inuu ogaado inaad arkeyso ama aad maqleyso.



Sameey darreemo dhanka wajiga ah, sida dhoola caddeyn ama inaad wareejiso bishimahaaga. Canuga waxaa soo jiita wajiga waalidka. Canuga wuxuu isku dayayaa inuu sameeyo darreemo la mid ah midka aad sameyso. Isaga ama iyada waxay baraneysaa waxa loola jeedo darreemaha.

Taabo canuga. Taabsho jilicsan oo badqabta waxay canuga umuujineysaa isaga ama iyada iney aamini karaan waalidkooda.

Canuga soo dhoweeyso. U dhowaanshaha dhanka jirka canuga wey dajisaa oo waxayna siisaa ammaan.

La hadal canuga. Canuga wuu sheegi karaa farqiga u dhaxeeya codka waalidiintiisa iyo dadka kale. Isaga ama iyada waxay fahmeen sida aad u hadleyso iyo dhawaqa aad adeegsaneyso.

La hadlidda canuga waa bilowga hormarka hadalkiisa ama hadalkeeda.



ILMAHA WUU OOYNAYAA

- Ilmaha wuu ooynayaa marka uu ubaahanyahay shey.
- Canuga wuxuu rabaa inuu kuu dhowaado.
- Wakhti ayey qaadanaysaa si loo barto in la fahmo in canuga oo ooynay.



OGOW SABABTA UU CANUGA U OOYNAYO.

Canuga haddii uu baahanyahay

→ sii cunto

Canuga haddii uu daalanyahay

→ ku caawi inuu hurdo. Qabo canuga oo taabo.

Canuga haddii uu kaadiyo ama saxaroodo

→ ka beddel xafaayadda

Canuga haddii uu doonayo wehel

→ Fiiri canuga, oo la hadal. La ciyaar canuga.



**Haddii aad daalantahay oo ooyinta canugana ku dhibeyso,
caawimaad raadso!**

